Alberta

**War saxaafadeed** release

# Ku celinta carruurta Alberta goobaha waxbarashada

Oktoobar 27, 2025

Haddii la ansixiyo, Bill 2, oo ah Xeerka Dib u Celinta Dugsiga, wuxuu dib u soo celin doonaa xasilloonida nidaamka waxbarashada Alberta, wuxuuna xaqiijin doonaa in ardaydu ay ku laabtaan waxbarashada iyada oo aan mar kale carqalad la kulmin.

Shaqaaqada joogtada ah ee macallimiinta ayaa carqaladisay fasallada guud ahaan Alberta, taas oo dib u dhigtay waxbarashada ardayda isla markaana sii ballaarisay farqiga heerarka wax qabadka. Maalin kasta oo dugsiyada xiran yihiin, ardaydu waxay luminayaan waqti waxbarasho oo muhiim ah, habraacyo maalinle ah, iyo taageero. Xeerkan la soo jeediyay wuxuu soo afjari doonaa shaqaaqada, wuxuuna dejin doonaa shuruudo macquul ah oo loogu talagalay heshiiska cusub ee wadajirka macallimiinta.

"Shaqaaqadani waxay socotay waqti ku filan. Waxaa cad in aan jid hore u jirin haddii aanan tallaabo qaadin. Xeerka Dib u Celinta Dugsiga wuxuu dib u habeeyaa diiradda dadka oo dhan ku saabsan waxa ugu muhiimsan, waxbarashada ardayda Alberta. Bill 2 wuxuu ardayda dib ugu soo celiyaa in ay noqdaan xarunta nidaamkeenna, annaga oo sii wada shaqada aan la leenahay macallimiinta iyo qoysaska si aan u dhisno xasillooni waarta oo ka hanaqaadda dugsiyada Alberta."
*Danielle Smith, Gudoomiyaha Gobolka*

Xeerka Dib u Celinta Dugsiga wuxuu sharciyeeyaa shuruudaha heshiiska hordhaca ah ee Sebteembar 2025, kaas oo bixinaya kordhin mushahar oo ah 12 boqolkiiba muddo afar sano ah, hagaajinno dheeri ah oo suuq ah oo gaaraya ilaa 17 boqolkiiba inta badan macallimiinta, iyo shaqaaleysiinta 3,000 macallin iyo 1,500 kaaliye waxbarasho. Heshiiska wadajirka ah wuxuu dhaqan geli doonaa laga bilaabo Sebteembar 1, 2024, ilaa Ogosto 31, 2028.

"Waqtiga lagu xaqiijinayo xasilloonida shaqada waa hadda. Xeerkan wuxuu bixinayaa waddo hore u socod oo togan in kasta oo sanad dugsiyeedku carqaladay. Tani waa tallaabo lagama maarmaan ah iyo go'aanka ugu mas'uulsan ee carruurta, macallimiinta, iyo waalidiinta. Haddii Bill 2 la ansixiyo, rajadaydu waxay tahay in fasalladu dib u bilaabmaan sida ugu dhakhsaha badan Arbacada, Oktoobar 29."
*Nate Horner, Gudoomiyaha Guddiga Hantidhawrka iyo Wasiirka Maaliyadda*

Heshiiskii ugu dambeeyay ee ay soo bandhigtay Ururka Macallimiinta Alberta wuxuu dalbaday laba bilyan oo dollar oo dheeri ah oo ka imanaya dowladda. Tani waxay si cad u muujisay in ururku uusan wax niyad ah u haysan wadahadal macquul ah oo lala galo dowladda, isla markaana uusan soo bandhigin dalab caddaalad ku dhisan.

"Waxaan aaminsanahay in adeegsiga qodobka notwithstanding clause uu yahay tallaabo lagama maarmaan ah si loo soo afjaro dhibaatada aan loo baahnayn ee ay sababtay shaqaaqada macallimiinta. Shaqaaqadani waxay gaartay heer ay dhaawac aan la sixi karin ku hayso

waxbarashada ardayda. Dowladdayadu ma ka labalabayn doonto inay isticmaasho dhammaan aaladaha sharci ee la heli karo si ay u difaacdo ardayda."

*Mickey Amery, Wasiirka Caddaaladda iyo Xeer Ilaaliyaha Guud*

Xeerkan waa jidka kaliya ee mas'uuliyadda leh si dib loogu soo celiyo xasilloonida, loo ilaaliyo ardayda, loona hubiyo in fasallada Alberta ay dib ugu noqdaan waxbarashada. Dowladda Alberta waxay si buuxda ugu heellan tahay xoojinta nidaamka waxbarashada, taageeridda macallimiinta, iyo in guusha iyo wanaagga ardayda lagu saleeyo go'aan kasta oo la qaato.

**Xaqiiqooyinka Muhiimka ah:**

- Bill 2 wuxuu soo afjari lahaa shaqaaqada macallimiinta ee ka socota gobolka oo dhan, wuxuuna sharciyeeyn lahaa heshiis wadajir cusub.
- Heshiiska wuxuu daboolayaa laga bilaabo 1 Sebteembar 2024 ilaa 31 Ogosto 2028, wuxuuna bixinayaa:
  - Kordhin mushahar oo ah 12 boqolkiiba muddo afar sano ah.
  - Hagaajinno suuq oo dheeri ah oo gaaraya ilaa 17 boqolkiiba 95 boqolkiiba xubnaha.
  - 3,000 macallin cusub iyo 1,500 kaaliye waxbarasho si loo yareeyo tirada ardayda fasalka loona xoojiyo taageerada waxbarasho.
- Shuruudahan waxay ka tarjumayaan heshiiska hordhaca ah ee Sebteembar 2025 oo ay soo jeediyeen hoggaanka Ururka Macallimiinta Alberta.
- Xeerku wuxuu ku daraa ciqaabo dhaqaale haddii aan la raacin, wuxuuna joojinayaa wadaxaajoodyada heer deegaan inta heshiisku shaqaynayo si loo xaqiijiyo xasilloonida shaqada ilaa 2028.

**Weydiimaha warbaahinta**

Sam Blackett
Sam.Blackett@gov.ab.ca
587-589-6048
Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

Marisa Breeze
Marisa.Breeze@gov.ab.ca
780-235-4427
Xoghayaha Saxaafadda, Guddiga Hantidhawrka iyo Maaliyadda

Heather Jenkins
Heather.Jenkins@gov.ab.ca
780-245-0421
Xoghayaha Saxaafadda, Wasaaradda Caddaaladda